

XASAASIYADDA CUNTADA

Waa maxay xasaasiyadda cuntada?

Xasaasiyadda cuntada waa walax cuntada ku jirta oo keenta fal-celin xasaasiyadeed sida finan, cuncun, gubasho, neefta oo kugu dhegta, cunaha oo ku xidhma ama neefsashada oo kugu adkaata, lallabo, matag, shuban ama calaamado kale oo daran. Dadka qaba fal-celinta daran ee xasaasiyadaha cuntada waxa laga yaabaa inay miyir beelaan ama ay dhintaan haddii ay la kulmaan xittaa wax aad u yar oo xasaasiyad ah.

Sida loo maamuuso martida leh

xasaasiyadda cuntada:

- DHAGEYSO sharraxaaddooda ku saabsan xasaasiyaddooda.
- OGAYSII maamulaha, cunto kariyaha ama qofka masuuliyadda haya.
- Ka AKHRI liiska cuntada, cuntooyinka iyo dhammaan liisaska walxaha cuntada laga sameeyay in ay ku jiraan wax xasaasiyad leh.
- U OGGOLOW martidu inay go'aan kooda gaadhaan.
- Ka HUBI cuntada martida inay gaartay wax xasaasiyad u yeeli karo.

Ka saarista waxyaabaha xasaasiyadda leh, sida xabbad farmaajo ah, cunto diyaarsan kama hortagayso falcelinta xasaasiyadeed. Hubi in cunto cusub oo aan xasaasiyad la hayn la diyaariyo haddii tii hore ay gaartay wax xasaasiyad keeni kara.

Waxyaabaha

xasaasiyadda la isugudbin kara:

- Goobaha wax lagu shiilo, saliid wax lagu shiilo, baaquliyada shiilidda ee waaweyn, baararka salarka, rootiga iyo hilib jaraha, weelalka la wadaago ama looxyada jarida
- Gacan ama gacan-gashi gaartay cuntooyin badan

**HADDII MARTIDA UU LEEYAHAY
FALCELIN XASAASIYAD, WAC 911 ISLA
MARKIIBA OO OGAYSII MAAMULKA.**

9-ka cunto
ee leh
xasaasiyadd
a Ugu Weyn



Ukumo



Kalluun



Kalluun Qolfeed
(Crustacean
Shellfish)



Qamadi



Geedka lawska




Laws



Digirta Sooy



Sisin



Caano